

Dulmar Guud oo ku saabsan Khadka Dahabiga Ah ee METRO

Talaabooyinka la Dhameystiray ee Mashruuca



Degmooyinka Washington iyo Ramsey iyo shanta magaalo ee uu u adeegayo Khadka Dahabiga ee Basaska Dheereeya ee METRO (BRT) oo gacan ka helaya dadweynaha degaanka iyo hogaamiyayaasha ganacsiga ayaa doortay khad gaaraya sagaal meyl oo dhex maraya Saint Paul, Maplewood, Oakdale, Landfall iyo Woodbury.



Maamulka Gaadiidka Dadweynaha ee Dawladda Dhexe (FTA) way ogolaadeen mashruuca Khadka Dahabiga ah iyo taariikhda cusub ee barnaamijku bilaabanayo, hay'addan oo maalgelisa mashaariicda gaadiidka dadweynaha ee waddanka oo dhan.



Xaqiijinta in la dhegysyo ra'yiga dadweynaha iyada la abuurayo gudiyo talo bixin si ay talo u siiyaan shaqaalaha mashruuca.



Abuuritaan Gudiga Maamulka oo ka kooban wakiilada Gudiga Mammulka Magaalada, Gaadiidka Dadweynaha, MnDOT, Degmooyinka Ramsey iyo Washington, iyo wakiilada shanta magaalo ee khadku marayo.



Abuuritaanka Gudiga La Talinta ee Bulshada iyo Ganacsatada oo dadka degan xaafadaha iyo wakiilada ganacsatada degaanka.



Kulanka gudiyada waxaa loo qabtaa si joogta ah waana kuwo u furan dadweynaha, waxyaabaha ka soobaxa internetka ayaa lagu soo bandhigaa.

La Socoshada Dhaqdhaqaaqa



Ka qeyb gelinta dadweynaha kulamada joogtada ah iyo kulamada kale ee loogu talo galay in lagu soo bandhigo macluumaadka ku saabsan mashruuca Khadka Dahabiga iyo ururinta ra'yiga iyo talada bulshada. La soco goobaha kuu dhow ee lagu qabanayo kulamada:

metrotransit.org/gold-line-meetings-and-events



Dhameystirka Qiimeynta Degaanka si loo ogaado waxyaabaha laga gaari karo iyo saameynta uu degaanka ku yeelan karo dhismaha Khadka Dahabiga ah iyo hawlgalka iyo qiimeynta sida loo yareyn lahaa saameyntaas. Nidaamkaas waxaa la filayaa inuu qaato laba sano.



Naqshadeynta mashruuca oo la filayo inay qaadatao ilaa afar sano. Dhameystirka naqshadda waxaa laga yaabaa in ay qaadatao ilaa afar sano.

Waxyaabaha soo socda



Injineeradu waxa ay hawashooda bilaabayaanka marka meel fiican laga gaaro naqshadeynta iyo hawsha qiimeynta. Ka shaqeynta abuuritaanka qodobada ka raacayo iyo daabacaadda lagala soconayo dhismaha maashruuca oo lagu dhameystirayo muddo laba sano ah.



Waxaa la filayaa in dhismaha uu qaato laba sano.

Adeegga Khadka Dahabiga ah waxa uu bilaabanayaa



Adeegga Khadka Dahabiga ah waxaa la filayaa inuu bilwodo 2024.

LA SOCO!

Qor iimeylkaaga si laguugu soo diro xogtii ugu dambeysay:

www.metrotransit.org/gold-line

Nagula soo xiriir iimeylka: goldline@metrotransit.org

Naga soo wac: 651-602-1955

Nagala soco:

@GoldLineBRT

@MetroTransitMN

If you need this information in an alternative format or language, contact:

- Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:
- Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:
- Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xiriir:
- နမ့်သးအိတ်ဒီးန့ၢ်ဘၣ်တၢ်စ့ၢ်တၢ်ကျိၤတဖၣ်အံၤလၢတၢ်ခံၣ်အကျိၤလၢတၢ်ကယုၤတၢ်တံၢ်အံၤအစီၢ်မ့တမ့ၢ်ကျိၤ.ဆဲးကျါ

Liz Jones, Community Outreach Coordinator | 651-602-1977 • elizabeth.jones@metrotransit.org